

**Waa maxay ALAN? W/Q: Xasan Cabdulle Calasow "Shiribmaal"**



Afka soomaaliyeed waa mid mucjiso ah oo afaf badan oo dunida caan ka ah maanta siyaabo badan uga horumarsan, balse, aan helin cid u rogta af-cilmi ah. Waa aan qirayaa inuu jiro dadaal iyo kacdoon ku wajahan tayenta iyo turxaan-bixinta afka. Cilmi iyo ogaal afkeenna ayey ku idil yihiin, waxaanse weli si toos ah bulshadu ugu koba illan inay ogaalkaas ku aasan afka ay debadda u soo saaraan.

Haddaba alanku waa goysmo iyo intii kolba is raaci karta oo aan sina loo kala jari karin. Si kale haddii aan u dhigo alanku wuxuu la mid yahay ximin ama xibin. Jirka nooluhu waxa uu u qeybsan-yahay ximno isku xariirsan ama isku tixan. Ximin walba tan kale ayey kaabtaa oo waa ay isla turqaan. Ma jirto xibin/ximin ka maaranta tan kale. Culimada caafimaadku waxay sheegeen in qofka jirkiisa ay ku jiraan (360) xubnood/ximnood.

Tusaale: shanta faruud ee ay gacantaadu leedahay ayaa waxay ka kooban-yihiin 19-ximnood. Afarta farood oo min seddax ximnood ah iyo suulka oo seddex ximnood ah, isu geyntooduna ay tahay: 19-ximnood. Halka salka ay faruhu ku fadhiyaanna uu isaguna ka koobmo: 8-9 goysmo. Jirka intiisa kalena waa uun sidaas. Haddaba, sidaas oo kale ayaa afkuna u leeyahay; goysmooyin isku xariirsan. Waxayna ka kooban-yihiin goysmo macno sammeynaysa oo eray ahaan gooni u istaagi kara iyo goysmo aan macno sammeyneyn, balse alan ah.

**Alanku asal ahaan halkee ayuu ka yimid, maxaase afkeenna dhexdiisa loo yaqiinnay?**

Alanku asalkiisii hore waxa uu ka yimid dadka beeraleyda ah. Beeraleydu, balka ganleyda, meseggada iyo qasabka ayey u yaqiinneen alan. Balka oo magaca guud ah ayaa wuxuu leeyahay

wax aad u macaan oo shaniin ah, kolka iniinta sabuulka laga jaro dabadeed waa la shafaa si loo keydiyo oo xilliga jiilaalka xoolaha loo siiyo ama isla goortaas ayeyba xooluhu daaqaan. Haddaba qofka beertaas jooga waxa uu cunaa quwaax, kaas oo ah balki oo inta la soo jaray ka dibna, diirka ama qolofa laga qaaday. Haddaba quwaaxaas ayaa wuxuu u qeybsan yahay sabarro isku xiran, balse, ximno ahaan u kala go'an. Halkaas ayuuna ka soo jeedaa alanku oo afkeenna hore ayaa loogu adeegsan jiray.

Guddigii afka qoray oo aan dhihi karo waa kuwii ugu mudnaa ayaa erayga alan adeegsaday isla mar ahaantaana ka dhigay eray cilmiyeed foodda hore ka galay miisaanka iyo muunadeynta afkeenna, gaar ahaan miisaanka suugaanta. Si aan isula fahanno milgaha uu alanku leeyahay: alanku wuxuu u kala baxaa sidaan: shaxdaan hoose ka arag.

ALAN shibbane ka billawda isla jeerkaasna shibbane kale ku dhammaada oo macno muuqda leh, sidoo kalena hal shaqal oo qura uu ku jiro. Sida midkaan:

<b>1. Shibbane, shaqal iyo shibbane</b>	<b>Laba shibbane iyo hal shaqal. 3-eray</b>
---	---

Wax	Gen	Cir	Hog	Cub	Xaq.
Mas, wad, can.	Bad, bac, gan.	Kal, far, san.	Sar, sab, gar.	Bar, kas, gal.	Gud, xog, wed.
Kur, kis, kan,	Tan, bir, bud,	Bur, jar, jug.	Jin, xig, xul.	Xab, dar, dib,	Dan, rar, rug.
Sin, sed, sax.	Sir, sug, shar.	Shil, shug,	Shan, lix, hal.	Cas, cul, fal, fir	Kob, leg, lud.

<b>2. Laba shibbane oo hore iyo gadaal ah</b>	<b>Iyo laba shaqal oo dhexda ah.</b>
---	--------------------------------------

Caal, quus, buur,	Qaac, gaar, daan,	Beer, qaan, ceel,	Caan, mooy, suul,	Suur, saar, saab.
Soor, quur, ciil,	Gaar, geed, maan,	Jaan, jiiib, jiis, jiir,	Joog, jees, juun,	Jeer, weel weer.
Wood, waal, geel,	Gaan kaal, koor,	Laac, leeb, luud,	Loor liig, meel,	Nool, noog, naax.

**3. ALANKI oo shaqal u yaal ah:**

Xays, deyn, keyn,	Leyn, reyn, beyr,	Meyr, heyn, beyd,	Ceyn, geyn, sayn,	Keyd, neyl, weyl.
-------------------	-------------------	-------------------	-------------------	-------------------

**4. ALANKI oo hal shaqal iyo hal shibbane ah:**

Il, us, ab, ib, af, or,	Ur, if, ul, ay, in, is,	In, ah, og, ah, aw,	Ash, ish, ush, ub,	
-------------------------	-------------------------	---------------------	--------------------	--

**5. ALANKI oo laba shaqal dheer iyo hal shibbane ah:**

Uun, iin, aar, aam,	Aag, oog, ool, eel	Uus, uur, oon, iib,	Aag, eeg, aal, aaf,	Aah, iid,
---------------------	--------------------	---------------------	---------------------	-----------

**6. ALANKI oo hal shibbane iyo hal shaqal ah oo lagu daray firgin/hamso'.**

Si' gu' da' ha' ka'	Ku' ta' tu' se' la'	Dhu' lo' ri' gi' ma'	Na' wa' hu' ci' ru'	Ya' ba' ga'
---------------------	---------------------	----------------------	---------------------	-------------

**7. ALANKI oo xaraf shibbane ah ku billowday, laba shaqalna ku dhammaaday:**

Sii, hoo, haa, hee,	Gee, taa, daa,			
---------------------	----------------	--	--	--

**8. ALANKI oo weero la kala jaray dhex galay:**

Su, mad, sa, bar,	A, laab, kan, sho,	Ki, bir, kas, mo,	Kaa, lay, keen, so,	Ka, bax, ku, dar.
-------------------	--------------------	-------------------	---------------------	-------------------

**9. ALANKI oo magac galay:**

Xa, san. Cu, mar.	Raa, ge. Jee, lle.	Jim, caa, le. I, dil.	Af, rax. A, yaan.	Il, haam. Roo, bo.
-------------------	--------------------	-----------------------	-------------------	--------------------

## 10. ALANKA SUUGAANTA:

<i>Gabay/guuroow</i>	<i>Shirib, masafu,</i>	<i>Jiifto/maanso,</i>	<i>Geeraar, saar</i>	<i>Baraanbur IKKB.</i>
----------------------	------------------------	-----------------------	----------------------	------------------------

### Gabay/guuroow:

<i>Alif iyo balaaqiyo naxwiyo, shaqal irmaaneeya.</i>	<i>A, lif, i, yo, ba, laa, qi, yo, nax, wi, yo, sha, qal, ir, maa, nee, ya.</i>
<i>Inteey gaal ku wayrixi laheyd, geeri door biday.</i>	<i>In, teey, gaal, ku, way, ri, xi, la, heyd, gee, ri, door, bi, day.</i>

### Shirib:

<i>Dhulku dadkoo dhan wow dhaxey</i>	<i>Dhiishaase nimba meel dhigtaa!</i>
<i>Dhul, ko, dad, koo, dhan, wow, dha, xey,</i>	<i>Dhii, shaa, se, nim, ba, meel, dhig, taa! 8-8=16</i>
<i>Adduunyo uur lahaan arkaa</i>	<i>Umulisaanse loo arkeyn!</i>
<i>A, dduun, yo, uur, la, haan, ar, kaa</i>	<i>U, mu, li, saan, se, loo, ar, keyn! 8-8=16 dhismo</i>

### Masafu:

1. Hore u dhiibo adaa helaayee	Ho, re, u, dhii, bo, a, daa, he, laa, yee. 10-dhismo
2. ambiiska haay nin kaloo heraayee	Am, biis, ka, haay, nin, ka, loo, he, raa, yee. 10
3. Ha dhowna kuu haddiyey ma doonee.	Ha, dhow, na, kuu, ha, ddi, yey, ma doo, nee. 10

### Jiifto/maanso:

<i>Haddii doobku guur gebo</i>	<i>Ha, ddi, doob, ku, guur, ge, bo,</i>	<i>7-dhismo.</i>
<i>Doonan waayo gabadhiis</i>	<i>Doo, nan, waa, yo, ga, ba, dhiis</i>	<i>7-dhismo.</i>
<i>Ma dadkaa u noqon ubad?</i>	<i>Ma dad, kaa, u, no, qon, u, bad</i>	<i>8-dhismo.</i>

### Geeraar:

<i>Hufnaanta dhibtii abuurtay</i>	<i>Huf, naan, ta, dhib, tii, a, buur, tay.</i>	<i>8-dhismo.</i>
<i>Inaaney hareyn yaqiinsoo</i>	<i>I, naa, ney, ha, reyn, ya, qiin, soo.</i>	<i>8-dhismo.</i>
<i>Hawaala adduun Rabbaa ogee</i>	<i>Ha, waa, la, a, dduun, ra, bbaa, o, g</i>	<i>9-dhismo.</i>
<i>Dadkuna kala hoodo weeye.</i>	<i>Dad, ku, na, ka, la, hoo, do, wee, ye.</i>	<i>9-dhismo.</i>

### Saar:

<i>Siin looxaa lagu dhigaa</i>	<i>Siin, loox, aa, la, gu, dhi, gaa.</i>	<i>7-dhismo.</i>
<i>Sadar waa la aqriyaa</i>	<i>Sa, dar, waa, la, aq, ri, yaa.</i>	<i>7-dhismo.</i>
<i>Socdaal waa loo kacaa</i>	<i>Soc, daal, waa, loo, ka, caa.</i>	<i>6-dhismo.</i>
<i>Sakada waa la la baxaa</i>	<i>Sa, ka da, waa, la, la, ba, xaa.</i>	<i>8-dhismo.</i>
<i>San waa laga neefsadaa</i>	<i>San, waa, la, ga, neef, sa, daa.</i>	<i>7-dhismo.</i>

### Baraanbur:

<i>Cimrigu kuu badayayoo caafimaad ku waar.</i>	<i>Cim, ri, gu, kuu, ba, da, ya, yoo, caa, fi, maad, ku, waar.</i>
---	--

Tobankaas si ee aan u dhigay, waxaan hubaa in habab kale oo iga qarsoonna la sii heli karo. Haddaba "Af cilmi ah ma jiro ee bulsho afkeeda cilmi u rogta ayaa jirta". Halkaasna waxaa nooga dhabowday awoodda afkeenna iyo ogaalka ku dhex aasan, una baahan in laga soo dhexsaaro. Miisaanka suugaanta waxaa saldhig u ah alanka. Haddii aanu alanku jiri laheyn waxaa dhib badan laga la kulmi lahaa habka miisaanka iyo kala meeleynta godadka iyo jaadadka kala geddisan ee suugaanta. Ujeedku waa inaan si dhab ah u baranno cilmiga afkeenna noogu il-xiran iyo waxa uu yahay; ALANKU.

**W/Q: Xasan Cabdulle Calasow "Shiribmaal"**

Imeyl: [cuute23@hotmail.com](mailto:cuute23@hotmail.com)